



Frühförderung  
Stadt Bern



# Barnaamijka booqashada guriga schritt:weise

Ku ciyaarista iyo barashada guriga qoysaska leh  
carruurta ay da'doodu u dhaxayso 1 – 3 sano

## Warqadda oo ku qoran luqado kale ayaa laga heli karaa halkan:

Deutsch (Luuqadda Jarmalka)  
English (Ingiriis)  
Shqip (Albaaniyaan)  
عربي (Carabi)  
Français (Faransiis)  
Español (Isbaanish)  
Türkçe (Turki)  
தமிழ் (Tamil)  
ትግርኛ (Tigrinya)  
Русский (Ruush)  
Українська (Yukreeniyaan)  
Kurdî (Kurdish)



## Muxuu barnaamijka u qabtaa qoyska?

- Ilmuhu wuxuu bartaa luqadda, ficilka iyo isdhexgalka bulshada marka uu ciyaarayo.
- Xidhiidhka u dhexeeya ilmaha iyo waalidka waa la xoojiyaa.
- Waalidiinta waxaa laga taageeraa dhammaan arrimaha la xiriira ubadka (tusaale, koox-ciyaareed/xannaano-maalmeed).
- Ilmuhu wuxuu yeelan karaa waayo-aragnimo cusub oo badan wuxuuna helayaa alaab-ciyaareed waxtar leh oo uu sii haysan karo.
- Ilmaha iyo waalidka waxa lagu xoojiyaa isku kalsoonaantooda.
- Qoysasku waxay bartaan qoysaska kale, dhaqdhaqaaqyada iyo goobaha shirarka ee xaafadooda.
- Madadaalada iyo ciyaaraha qoyska oo dhan.
- Waxaas oo dhami waxay xaqiijinayaan bilawga wanaagsan ee xanaanada iyo dugsiga.

## Sidee u shaqeeyaa barnaamijku?

- Booqde guri wuxuu qoyska ku soo booqdaa guriga todobaadkii hal mar.
- Soo-booqdaha gurigu wuxuu la yimaadaa fikrad cusub oo ciyaar, buug sawir ama ciyaar.
- Qoysaska ka qaybgalaya waxay kulmaan labadii toddobaadba mar shir kooxeed.
- Kulanka kooxda: Wadaagista khibradaha, macluumaadka khubarada ku saabsan mawduuca carruurta, caafimaadqabka, ciyaarta, farsamaynta iyo heesaha koox ahaan, dalxiisyo... kooxda dhexdeeda, dalxiisyo...

## Filimka

Si aad u fahamto, daawo filimkeena ku saabsan barnaamijka booqashada schritt:weise guriga.



## Sideen uga qayb qaadan karaa?

- Diwaangelintu waa suurtagal wakhti kasta
- Muddada: 18 bilood
- Bilawga sanadlaha ah bisha Maarso
- Barnaamijka waxaa lagu bixiyaa luqado kala duwan.
- Waxay ku kacaysaa 10 faran bishii, hoos u dhac waa suurtagal.





Gesundheitsdienst der  
Stadt Bern  
Frühförderung primano  
Monbijoustrasse 11  
3011 Bern

031 321 41 60

[primano@bern.ch](mailto:primano@bern.ch)

**primano.ch**

